**SHARCI - Lamb. 20 ee 8 Abriil 1970**

**WAX KA BEDDELID XEER NIDAAMIYAHA GARSOORKA MILITARIGA**

## GOLAHA SARE EE KACAANKA

KADIB markii la arkay AXDIGA KOWAAD ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969kii;
KADIB makii la arkay sharciga lamb 1 ee 21 Okboobar 1969;
KADIB markii laga baaran degey baahida loo qabo in wax laga beddelo waxna lagu daro Xeer Nidaamiyaha Garsoorka Militariga lamb. 24 ee 31 Maarso 1964;
IYADOO Goluhu fulinayaa awoodiisa sharci dejin;

## WUXUU XEERAYNAYAA:

***Xubnaha Garsoorka Ciqaabta Militariga***

### Qod. 1

Waxaa lagu beddelay faqradda labaad ee qodobka 1 ee Xeer Nidaamiyaha Garsoorka Ciqaabta Militariga sidatan:

'Maxkamadda Militariga iyo Maxkamadda Sare ee Militariga saldhigoodu waa Muqdisho. Dekreeto ka soo baxday Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ayaa lagu dhisi karaa Maxkamado goobo kale ee dalka gudahisa.

### Qod. 2
### Maxkamadda Militariga

Qoraalka qod. 2 ee Xeer Nidaamiyaha Garsoorka Militariga waxaa loo beddelay sida hoos ku qoran:

1. Maxkamadaha Militarigu waxay ka kooban tahay Guddomiyaha oo wata darajada aan ka yareen midka Kabtaanka, kaas oo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka uu dekreeto ku soo magacaabay kadib markii uu la tashtay Xoghayaha Dowladda ee Difaaca, iyo Guddomiyaha Maxkamadda Sare ee Militariga; waxaa kale ee wehliyaha labo Garsoore oo Qorayaal ah oo ka darajo hooseeya Guddomiyaha Maxkmadda, kuwaaso ioo yagana uu Madaxeymaha Golaha Sare ee Kacaanku uu dekreeto ku magacaabi doono kadib tala soojeedinta Xoghayaha Difaaca iyo Guddomiyaha Maxkmadda Sare ee Militariga, waxaa kale oo ka mid noqon kara hal ama ka badan Garsooreyaal joogta ah iyo Garsooreyaal dabooli kara jagada oo si bakhti nasiib ah loo soo xulay, kulligood oo daarajo hooseeya Guddomiyaha, waxaana Guddomiyhu uu ka soo xuli doona saraakiisha ka tirsan Ciidanka qalabka sida.
2. Maaxkamadda Militarigu waxay go'aamin doonaan iyagoo wada jir ah Guddomiyaha, Garsooraha Qoraa ah iyo Garsoore la soo xulay si nasib ah. Haddii Guddomiyuhu uu maqan yahay, ama cudur daar ama howl kale awgeed soo xaadiri waayo, Garsooraha ugu darajada sareeyo ama howsha wadideeda ku raagay ayaa lagu beddeli doona Guddomiyaha.
3. Guddomiyaha iyo Garsoorayaalka Qoraa'ga ah waxay xilka hayn doona ugu yaraan 2 sano, haddi ay fursadi jirtana waa in la soo xulaa saraakiisha leh aqonta sharciga
4. Maxkamadda Militariga waa in ay leedahay, xafiiska Guddoonka, Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud iyo xafiiska Qoraalka.

5. Howlaha Qoraalka Militariga waxaa wadi kara Sarkaal leh darajada aan ka sareeyn Kabtanka, waxaana magacaaba Xoghayaha Dowladda ee Difaaca kadib soo jeedinta Guddomiyaha Maxkamada Sare ee Militariga. Haddi aysan jirin saraakiil buxisa jagadaasi waxaa lagu magacaabi doonaa saraakil xigeen loo tababaray howlahaasi.

**Qod. 3**
**Maxkamadda Sare ee Militariga**

Waxaa qoraalkan lagu beddelay midka ku qornaa qod. 3 ee Xeer Nidaamiyaha Garsooraka Militariga:

1. Maxkamadda Sare ee Militariga waxay saldhig ku leedahay caasimadda waxaana ka tirsan Sarkaal Sare oo Guddomiye ah oo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ka soo xushay saraakiisha ciidanka qalabka sida, 3 La-Taliyee oo iyagana dekreeto Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku ku magacaabay kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Difaaca iyo Guddomiyha Maxkamdda Sare, iyagoo laga soo xulay sarakiisha ciidanka qalabka sida ee daraja ka hooseysa midda Guddomiyahaa oo haddii suurto gal tahay leh aqoonta sharciga; 2 ama in ka badan Garsooreyaal Militari oo joogta ah oo si nasiib ah Guddomiyaha Maxkamadda Sare uga soo dhex xulay saraakiisha ciidanka qalabka.Sida

   Guddomiyaha iyo 3da La-taliye waxay xilka sidi doonaa muddo aan ka yareeyn 2 sano.
2. Maxkamadda Sare ee Militarigu waxay go'ankooda gaari doona markii ay soo xaadiraan si wadajir ah Guddomiyaha, 2 La-Taliye Militari iyo 2 Garsoore Militari oo si nasiib ah loo soo xulo. Haddii uu Guddomiyaha maqan yahay, ama is khilaaf howl jirto, ama ciriiri kale jiro waxaa lagu beddeli doona sarkaalka ugu darajo sareyo ama howl qabashadiisu ay ugu dheertay inta ka shaqeeysa Maxkamadda Militariga.
3. Maxkamadda Sare ee Militariga waxay yeelan doonta Xafiiska Guddoonka, Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Xafiiska Qoraalka iyo xafiiska maamulka.
4. Waxaa lagu dabaqi doonaa Maxkamadda Sare ee Militariga amarrada ku qoran faqradda 3aad ee qod. 1 ee isla Xeerkaan iyo faqradda 5aad ee qodobka sare ku xusan.

**Qod. 4**
**Xeendabka xeer nidaamiyaha iyo ilaalinta**

Waxaa lagu kordhiyey Xeer Nidaamiyaha Garsoorka Militariga qodobka 3bis oo sidatan loo aqrin doono:

'Guddomiyaha Maxkamadda Sare ee Militariga waa madaxa Gaarsoorka Militariga. Waxaa hoos yimaada militari kasto iyo xubin kasto ee ka tirsan Garsoorka Militariga. Guddomiyaha Maxkamadda Sare ee Garsoorka Militariga ayaa iska ley awooda ciqaabeed ee ku qoran nidaamka ciidanka. Isaga ayaa iska leh awood bedeelidda shaqaalihiisa wuxuuna soo jeedin kara in laga qaado xilaalka ka hor intuu uusan dhamman muddada ku carifan qod. 2, 3 iyo 5.

**Qod. 5**
**Dhaarta**

Waxaa lagu beddelay qod. 4 ee Xeer Nidaamiyaha Garsoorka Militariga qoraalkaan oo sidatan loo aqrin doono:

‘Xubin kasto ee ka tirsan Maxkamadaha Militariga iyo Maxkamadda Sare ee Militariga, Xeer-Ilaaliyaasha, Qoreeyaalka, marka ugu horeeysan ee ay kulmaan, ama intii aysan howshooda bilaabin waxay mari doonaan dhaarta hoos ku tixan.
Guddomiyuhu wxuu ku dhaaran doona Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka hortiisa, inta kalena Guddomiyaha Maxkamadda sare hortiisa

Dhaartu waxay noqon doonta sida hoos ku qoran:

‘Waxaan ku dhaartay magaca Illahay in aan dacaad u noqon doono Jamhuuriyadda Dimuqratiga ah ee Somaliya, in aan u hoggansanaan doonon shuruucda ku saleeysan ahmiyadda Kacaanka iyo in aan gudan doono wajiibaadkeyga ee xaafiis anigo oo sare u qaaday cadaaladda’.

**Qod. 6**
**Xafiiska Xeer-Ilaalinta Militariga Guud**

Qoraalka ku qoran qodobka 5 ee Xeer Nidaamiyaha Garsoorka Militariga waxaa loo beddeley sidatan:

1. Xafiiska Xeer-Ilaalinta Militariga wuxuu saldhig ku leeyahay Caasimadda wuxuuna ka kooban yahay Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Militariga iyo 2 ama ka badan ee ku-xiggeeno ah. Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ayaa dekreeto kadib tala soojeedinta Xoghayaha Dowladda ee Difaaca ku amri karo in saldhigyo kale la suubiyo.
2. Xafiisa Xeer-Ilaalinta wuxuu leeyahay awoodda fulinta howlaha ciqaabta ee Xeer-Ilaaliyaha Guud loogu xilsaaray Xeer-Nidaamiyaha Garsoorka oo lagu ansixiyey Sharci-dekreetada lamb. 3 ee 12 Juun 1962.
3. Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Militariga iyo ku-xigeenadiisa waxay xilka hayn doonaan muddo aan ka yareen 2 sano waxaana laga soo xuli doona saraakiisha ciidanka qalabka sida, haddii ay fursad jirtaana kuwa leh aqoonta sharciga, waxaana Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Difaaca iyo Guddomiyaha Maxkamadda Sare ku magacaabi doona dekreeto.

Muqdisho, 8 April 1970.

Madaxwynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
**Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre**